

English

Qoraal Kusaabsan Mamnuuca Muslimiinta

Guudmar

Madaxweynaha Trump wuxuu saxiixay Amarka Fulinta--Wareegto Madaxweyne-- (EO) oo lagu joojinayo safarka iyo socdaalka lagu imaanayo dalka Maraykanka laga bilaabo maalinta Jimcaha, January 27, 2017. Amarkaasi Fulineed (EO) oo si degdeg ah u dhaqan galay, ayaa shaqsiyaadka lala beegsaday waxa ay ka soo jeedaan toddoba dal oo kala ah, Iran, Ciraaq, Liibiya, Soomaaliya, Suudan, Suuriya, iyo Yemen. Inkastoo lagu tilmaamo 'Muslim Ban' ama 'Xayiraada Muslimka,' hadana wareegtadan madaxweyne waxay saamayn doontaa dhamaan dadka kasoo jeeda todobadaa wadan iyadoon loo eegi doonin diintooda iyo isirkooda midnaba. Si kastaba ha ahaatee, mamnuucida waxaa ku dahsoon oo dheer 'kala sooc diimeed' oo aan horay loo arag, taas oo ka hortagaysa qof kasta oo muslim ah oo cadaadis kasoo cararay oo doonaya magan galyo qaxootinimo. Waaxda ilaalinta xuduudaha Maraykanka (U.S. CBP) waxay xanibeen, xireen, ama mastaafuriyeen qaar kamida dadkii diyaaradaha soo saarnaa iyo kuwii soo caga dhigtay garoomada oo watay sifo qaxootinimo ama dal-ku-gal (viso) sax ah. Dadkaasi oo kasoo jeeda todobadaa wadan ee kor ku xusan.

Xayiraadan socdaalku waxa ay saamaysay dad badan oo ku kala duwan aqoonsiga sharciyada, waxana kamid ah: qaxooti, dad haysta daganaansho rasmi ah (ciqaamada loo yaqaan LPR ama Green card) iyo waliba dadka aan Maraykan u dhalan oo labo dhalasho haysta, kuwaasi oo ka soo jeeda wadamaasi la mamnuucay. Waxa kale oo uu arinkani saameeyay dadka ka soo jeeda, ama ku dhashay, Koonfur-galbeed Asia, koonfurta Asia, waqooyiga Africa, iyo gobollada Bariga Afrika ka baxsan oo ka mid ah toddoba dal ee la mamnuucay, balse iyaga ugu danbayntii waa la siidaayay.

Maalmo kadib markii ay soo baxday wareegtada madaxweyne ee amraysa xayiraada socdaalka ayaa boqolaal garyaqaan, turjumaano, iyo mutadawiciin badani sku dayey in la helo caddayn si loogu dadaalo in ay ilaaliyaan shakhsiyaadka lala beegsaday mamnuucidda. Tilmaan-bixiyahan waxa ay ujeedadiisu tahay inuu siiyo xog dheeraad ah shaqsiyaadka lala beegsaday amarka madaxweynaha, inkastoo aan xogtan looga kaaftoomi karin talo bixin sharci ama adeeg garyaqaan. Fadlan u isticmaal tilmaan-bixiyahan caawimaad ahaan, adoo raadsanaya garyaqaan kiiskaaga gaarka ah gooni kaaga caawiya.

Qoraalkan waxa iska kaashaday soo saaristiisa dad kala duwan iyo ururo badan oo xil iska saaray inay idiin soo gudbiyaan xogta ugu danbaysa ee ku saabsan amarka madaxweyne Trump ee la xiriira xanibidda socdaalka idadka ka soo jeedida todobada dal ee kor ku xusan. Warbixintani waxay ku turjumantahay luuqadaha kala ah: Carabi, Persian, Somali, Urdu, iyo Luuqadda Galbeedka Armenia. Waad ku mahadsantihii is-xilqaanka aad muujiseen.

Ujeedada qoraalkan waa in uu:

- Wargeliyo shakhsi walba uu mamnuucan wax ugaystay xuquuqdooda iyo inuu tuso adeegyada ay u qalmaan.
- Tusiyo tallaabooyin wax ku ool ah oo la gudboon qofkii ay saamaysay xayiraadan socdaalku, iyo dadka laga yaabo inay dib ka saamayso.
- U tilmaamo ama hago dadka sida iyo meesha ay tallaabooyin u qaadi karaan; sida in ay la xiriiri karaan xubnaha Golaha Guurtiga u matala gobolka ay ku noolyihiin.
- Siiyo bogag waxtar leh si ay u helaan xogta adeegyada dheeraadka ah oo ay ka heli karaan dhinaca qanuunka, dhinaca bulshada u doodda xuquuqda, iyo hay'adaha sida tooska ah u taakuleeya dadka.

Dadka doonaya xog dheeraad ah ama macluumaad gaara waxa ay la xiriiri karaan:

bannedlives@iranianalliances.org ama info@ajammc.com. Hagahan waxaa soo ururiyey isbahaysiga ka mid ah ururada, oo ay ku jiraan [Ajam Media Collective](#), [Iranian Alliances Across Borders \(IAAB\)](#), [Iraqi Transnational Collective \(ITC\)](#), [Palestinian Youth Movement \(PYM\)](#), [Southwest Asian & North Afrikan - Los Angeles \(SWANA-LA\)](#), [SWANA Rising for Collective Liberation \(SRCL\)](#) iyo sidoo kale in ka badan 100 samafalayaal ah.

Koobnaansho

[Qodobada Guud:](#)

[Macluumaad Dheeri Ah](#)

[Xukunka Soo Bandhigida Shaqsiga iyo Amarka Dacwa Joojinta ee ACLU](#)

[Macluumaadka Quseeya Qofka Xiran](#)

[Dadka Ku Xayiran Meelaha Dhexe:](#)

[Macluumaad:](#)

[Adeega Sharciga oo Bilaash ah](#)

[Talo Ku Aadan Socdaalka](#)

[Soo Gudbinta Dambiga Naceybka iyo Takoorka ah:](#)

[Turjubaan: Talooyin iyo Fursado Tabaruceed](#)

[FALAL DHEERI AH, MACLUUMAAD IYO LA XIRIIRID](#)

[Adeega u Doodayaasha kuu Dhaw](#)

[Macluumaad ku Aadan Caafimaadka Maskaxeed \(Wadanka oo Dhan ama kuwa Maxalliga ah\):](#)

[Macluumaadka Madaniga ee Qaxootiga:](#)

[Ka Raadso Macluumaad Dheeri ah:](#)

[Haddii Waaxda Socdaalka iyo Xuduudaha \(ICE\) Kuu Yimaadaan:](#)

Macluumaad Muhiim ah:

- Xayiraada socdaalku waxuu saamaynayaa muwaadiniinta kasoo jeeda wadamada **Iiraan, Ciraaq, Liibiya, Soomaaliya, Suudaan, Suuriya, iyo Yemen.**
- Haddii aad **maraykanka ka tahay muwaadin**, lagumo tarxiili karo. Hadii aad maraykanka ka baxdidna, laguUMO diidikaro dib u soo gelida wadanka. Laakin, waxaa dhici karta in lagu waydiiyo su'aalo, si aad ahna lagu baaro.. Waxaana jirta in dad badan su'aalo laga waydiiyey arimahooda ka muuqda 'baraha bulshada,' sida Facebook, markay maraykanka ku so noqdeen.
- **Haddaadan ahayn muwaadin maraykan ah**, waxaa muhiim ah in aad la xiriirtid garyaqaanada socdaalka intaadan u safrin wadan kale.
- Qoraalkaan wuxuu quseeyaa dadka aan muwaadiniinta ka ahayn wadanka mareykanka oo ku sugan xaaladaha hoos ku qoran:
 - **Qofkii haysta daganaansho sugan 'Green card':** Hadii aad ku jirtid dadka wadanka ku jooga daganaansho ama kaarka 'Green Card' ka waxaa lagu farayaa in aad la tashatid garyaqaan ku takhasusay arimaha socdaalka iyo hijrada inta aadan qorshaysan safar dalka dibadiisa ah. Hadii aad dalka Maraykanka dibadiisa ku sugantahy, sidoo kale waxaa kula gudboon inaad raadsatid qareen ama abukaate kaa caawiya arimaha socdaalka. Hadii lagugu xanibo gegida diyaarada (ama Airport ka) marnaba ha yeelin inaad saxiixdid waraaqda I-407 oo macnaheedu yahay inaad adigu iskaa uga tanaasulaysid sharcigaaga, xataa hadii lagugu qasbo ha saxiixin waraaqdaas marka laga reebo inaad adigu shakhsi ahaan rabtid in lagu tarxiilo oo aadan u baahnayn daganaashaha wadanka Maraykanka.
 - **Dadka laba wadan dhalasho ka haysta:** Hadii aad u dhalatay mid kamida 7da wadan ee xayiraada socdaalka lagu soo rogay, oo aad isticmaalaysid **Baasaboore** wadan kale oo aan Maraykan ahayn, waxaa dhici karta in lagu diido inaa wadanka soo gashid. Warar badan oo isburinaya ayaa arinkan ku sugan, marka waxaa haboon inaad sharci-yaqaan kala tashatid safaradaada dalka dibadiisa ah.
 - **Haddaadan sharci haysan:** Hadii aadan wax waraaqo sharci ah haysan oo aad ku noshahay dalka Maraykanka gudihisa, la tasho sharci-yaqaan si uu kaaga caawiyo hababka kula gudboon oo aad sharci ku heli kartid iyo khataraha kusoo wajihi kara. Ku dadaal inaad waraaqahaga iyo dukumentiyadaada isku urursatid waa intaasoo ay kusoo wajahdaa xaalad tarxiil. Sidoo kale samayso kaydka meelaha lagala xiriiri karo asxaabtaada, ehelkaaga, qaraabadaada; hadii ay caruur ama waayeel aad daryeeshid kuu joogaan ku dadaal inaad heshid qof aad uga tegi kartid hadii xaaladu kugu xumaato. **Marnaba albaabka haka furin cidii kasocota federalka iyo booliska. Markasta weydii inay soo qaataan waraaq maxkamadeed oo u ogolaanaysa inay gurigaaga baaraan.** Waxaad ku xujayn kartaa inay waraaqda maxkamada kaaga soo dusiyaan

albaabka hoostiisa. Hadii aad leedahay qareen ama 'looyar' ama abukaate hadba sidaad u taqaan, markaas u sheeg booliska inay la xiriiraan qareenkaaga ama abukaatahaaga.

- **Arday, Caalim, Shaqaale:** Hadii aad wadanka ku joogtid fiiso ardaynimo ama cilmi-baare jaamacadeed, ama shaqaale dibada laga soo kiraystay, oo aad badanaa gashid safaro dalka dibadiisa ah oo la xiriira hawlahaaga ardaynimo, aqoonyahanimo, ama hawlahaaga shaqo markaas amarkan madaxweyne wuu ku saamaynayaa 90 beri. Sidaas awgeed ardaydu gaar ahaan hala xiriireen jaamacada ay dhigtaan xafiiskeeda qaabilsan arimahaas, ama qareen sharci oo kaa caawiya arinkaas gaarka ah.
- **Qofkii fiiso haysta:** Hadii aad kasoo jeedid 7da wadan ee xayiraada lagu soo rogay, balse aad hada gacanta ku haysatid fiiso aan dhicin, ama ogolaansho inaad fiiso helaysid ah, lakiin aad wadanka Maraykanka dibadiisa ku sugantahay waxaa dhici karta inaad dhib kala kulantid soo laabashada ama soo gallida dalka. Fiisooyinka soo socda looma ogolaan doono inay kusoo laabtaan wadanka (liiskani ma dhamaystirna):
 - B1/B2 fiisaha la dhaho oo booqashada ah
 - H-visa , fiisaha la dhaho oo shaqaalaha dibada laga soo kiraysto ah
 - K-1 fiisaha la dhaho oo khuseeya qofka aad guursan doonto oo dalka keenaysid adoon wali aroosan.
 - J-visa, fiisaha la dhaho oo loogu talagalay is-dhaafsigu tababarada iyo booqashada
 - Q-visa, fiisaha is-dhaafsigu tacliinta iyo dhaqanka/dalxiiska
 - V-visa, booqashada xaasaska iyo caruurta dadka degaanshaha haysta ama kaarka loo yaqaan "Green Card."

Tilmaamo Dheeraad ah:

Dadka wacan ee u qareemista muslimiinta ayaa waxay isku soo dubba rideen [xaqaa'iq](#) ku saabsan mamnuucista muslimiinta "Muslim Ban" iyo [tilmaamahaan beesha](#) oo kuu sheegaya sida arrintaani kuu saameyneyso iyo waxaad ka yeeli lahayd.

Jiheyn kale oo waxyaalo badan oo fiican ku jiraan oo ay is ku soo dubba rideen Gudiga Lidiga ku ah Takooridda ee Carabta Ameerikaanka ah American - Arab Anti-Discrimination Committee (ADC) - oo isugu jira qeexidda sharci ahaaneed ee Amarka iyo waliba tilmaamo la xiriira arrimaha laga hadlayo oo qodobaysan oo ay waheliyaan sida loola xiriirayo wakiillada yaa [halkaan](#) laga heli karaa.

Akhbaar siyaado ah oo laxiriirta qaxootiga, immigrants iyo amarka maamul dowliga ah ee madaxweyne Trump ayaa [dukumentigaan](#) soo socda laga heli karaa.

Waraaqdii ACLU ee in dadka sharci daro lagu haysto iyo xukunkii maxkamada ee ahaa daaya dadka:

American Civil Liberties Union (ACLU) iyo hay'adaha kale ee u dacwiya qoxootiga ayaa meel badan oo wadanka ka mid ah ka gudbiyay dacwadu badan oo ay kaga soo horjeedaan qaybo badan oo ka mid ah

qaraarkii oo soo saaray madaxweynaha maraykanku iyo sida loo hirgaliyay. Sida aan ognahay dacwadahaas waa lagu guuleeystay, waxanay keentay in maxkamada badan si ku meel gaadh ah isku hortaagaan hirgalinta amarka madaxweynaha. Magaalada New York garsoore heer fadaraal ah ayaa soo saartay “*amar si ku meel gaadh ah loogu joojinayo dib u celinta dadka oo dhan ku xayiran madaarada Maraykanka.*” Magaalada Boston garsoore kale oo heer fadaraal ah ayaa mar ku bixiyey in aan dadka dib loo celin, dhowr jeer la baadhin, lana xidhin. Wax ka soo bixi donaa amaradaasi wali ma cada waayo dacwadahaasi wali way laalanyihiin.

Iyada oo amaradaas oo dhan la soo saaray ayaa walidadka dhowr jeer la baadhayaa, la xidhayaa, ka dibna la masaafurinayaa dadka. Dadka u maleenaya amarkan uu soo saaray madaxweynaha Maraykanku in oo saameenaya waxa ay u baahanyihiin in ay aad kuga fiirsadaan inta aanay safar soo galin, lana tashadaan qareen dhinca socdaalka ah.

Haddi aad u baahato warar dheeraad ah oo ku saabsan halka ay marayaan dhacwaddaha lagaga soo horjeedo go'aankii madaxweyna Trump, [halkan](#) guji. Warar dheeraad ah oo ku saabsan dacwaddii New York, [halkan](#) guji. [Halkan](#) guji si aad u aragto qoraalkii dacwadaas.

Macluumaad loogu talagalay dadka xiran

Haddii qof aad garanayso lagu xiray garoonka diyaaradaha ah, wac khadka ACLU maxaliga ah. Waxaad macluumaad [halkan](#) ka heli kartaa. Waxaad kaloo la xiriiri kartaa Waaxda Legal ADC ee talo degdeg ah at (202) 244-2990. Ha ka tegin Maraykanka ka hor hadlayay qareen.

- Haddii aad tahay garoonka **diyaaradaha SFO**
 - OneJustice Balkan beey Ku beeganyihiin diyaarna layihiin hay'ado taageero sharciga-Kala xiriir Twitter ([@onejusticeorg](#))
- Haddii aad joogto garoonka diyaaradaha **LAX**
 - Wac ACLU taleefoonkooda Southern California ee (213) 977-5245.
- Haddii aad tahay garoonka **JFK**
 - La xiriir qareenka JFK marayo email (JFKneedalawyer@gmail.com), Twitter ([@nobanjfk](#)), ama iyada oo ay hotline (1-844-326-4940)
 - Hotline Duqa mayorka ah Cuomo ee: 1-888-769-7243

Dadka ku xayiran safarka

- Haddii aad u baahan tihiin meel aad joogtaan, isku day [AirBnb](#), taas oo u muuqata in ay [bixinayaan guryaha oo lacag la'aan ah](#) kuwa ay ganaax ku saameeyeen
- Haddii aad u baahan tahay meel wac [Viber](#) app ogolaan doonaa bilaash wicitaanada hadda in telefoonka guriga ama mobile ka dhexeeya Maraykanka iyo 7 dal oo saamaysan mamnuucidda
- Haddii aad ku xayiran tihiin **Canada**, wasiirka socdaalka ayaa sheegay in Canada ay bixineyso [deganaansho ku meel gaar ah](#), sababta keentay waa xayiraadda Muslimka.

- Haddii aad raadinayso meel aad joogtid **Toronto**, waxaa jira guryaha group iskaa wax u qabso abaabulka ah: [Facebook](#), [Google Doc](#)
- Haddii aad haatan ku jiraan gaadiidka iyo la xiriiri kartaa xubnaha qoyskaaga, isla markiiba la xiriir iyaga oo si ay u heli kartaa qareen (haddii aadan horay u leeyihiin hal) idiin ka hor yimid.
 - Qareenka madaarada waxaa ka qabashada xaaladaha oo dhan xiray si gaar ah, oo waxay u baahan yihiin in ay soo bandhigaan Form G-28 u saxiixay si uu u cadeeyo jiritaanka xiriir qareen-macmiilka ah. Wixii suurtagal ah, kuu diyaarin si ay u diyaariyaan a G-28 la qareen tabaruc la heli karo.
- Haddi aad qareen haysato, la xidhiid inta aanad Maraykanka iman.
- Haddii aad aaminsan tahay inaad tahay halis ugu cadaadis ka dalka aad ka soo jeedo, diyaar u ah inay ka codsadaan wareysi cabsi lagu kalsoonaan karo dekedda Maraykanka ah ee laga soo galo (garoonka) ahaan. Waxaad xaq u leedahay in aad codsato qareen waraysiga.

Haddii Enforcement (ICE) Immigration and Customs gurigaaga imaadan:

ACLU xuquuqdaada garo Initiative:

- Haka furin albaabka. Is deji. Waxaad leedahay xuquuq.
- Weydii waxa ay u joogaan, (oo weydiiso turjubaan haddii aad u baahan tahay mid ka mid ah)
- Haddii ay damcaan iney gurigaaga soo galaan, weydii haddii *ay wataan qabaan amar ah uu saxiixay xaakin**
- Haddii aynan haysanin qabaan amar ah uu saxeexay xaakin, waad u diidkartaa in ay soo galaan. Waydii in ay kaaga tagaan warqado macluumaad ku qoranyahay.
- Haddii ay isku dayaan in ay khasab ku soo galaan, ha ladagaalamin. Dadka guriga kulanool, waxaad ku tiraahdaa aamusa oo ha hadlina.
- Haddii lagu xiro, ha hadlin hana saxeexina wax waraaqo ah ilaa aad la hadasho qareen.

*Waaranka ICE (Form 1-200, 1-205) uma fasaxayo in ay gurigaaga soo galaan adiga oon u fasixin.

Khayraadka:

Adeegyada Sharciga oo bilaash ah

- [American Immigration Ururka Qareennada](#)
- [Immigration Legal Directory](#) (laga heli karaa luqado kala duwan)
- [Immigration Network Advocates](#)
- Qalab oo online qareen helo ee [Mashruuca Socdaalka Qaranka ee Ururka Qareennada Qaranka](#)
- Xarunta Immigrant Justice Qaranka: Jadwalka la tashi oo si sharci by phone (312-660-1370) ama email: immigrantlegaldefense@heartlandalliance.org
- Liiska [maxkamadaha socdaalka ah](#) qareenada iyo ururada bixiya adeegyada sharciga oo bilaash ah
- [Xarumada Waxtarmada Legal Immigrant](#) ayaa qaab dhamaystiran macmiilka online Qaadasho la'aan

- *Ardayda Graduate ee nidaamka University of California, kuwaas oo ay saameeyeen ganaax ayaa sidoo kale laga yaabaa in raadsato talo sharci oo bilaash ah ka UAW 2865. Waxaad ka heli kartaa macluumaadka xiriirka ee aad cutubka maxaliga ah [halkan](#).*
- [OneJustice \(dadka deegaanka California dakhligoodu hooseeyo\)](#)

Wixii Talo Socdaalka:

- [CUNY CLEAR](#) bixiyaan gargaar sharci oo ah in kuwa u baahan talo socdaalka ee New York. CC kaalmo ku siin doonaa in Carabi, Bangla, English, French, Spanish, Urdu, iyo luqado kale oo badan, oo qaban karaan aqoon isweydaarsiyo aad Masaajid maxaliga ah. Waxaad iyaga ku gaari kartaa 718-340-4558.
- [Anti-takoorka Guddiga The American-Arab \(ADC\)](#) waxay bixisaa pro-Bono sharci talo / gargaar Arab Americans ku saabsan arrimaha socdaalka, muuqaalka, iyo takoorka. Waxaad halkan ku gaari karaan: (202) 244-2990 ama legal@adc.org

Faafin ka dhiib Dambiyada Nacaybka & Takoorka:

- [Golaha ah American-Islamic Relations \(CAIR\)](#) ayaa ah shaqaalaha xuquuqda madaniga on gacanta in ay helaan warar takoor on joogta ah maalin walba oo shaqo si ay u xaliyaan dhexdhexaadin, gorgortan, cadaadiska dadweynaha ama, haddii loo baahdo, iyada oo loo marayo talaabo sharci ah. Waxaad kala xiriiri kartaa at 312-212-1520 ama civilrights@cairchicago.org.
- [Machadka Arab American Institute \(AAI\)](#) waxay bixisaa macluumaad badan oo ka mid ah warbixinta iyo garashada dambiyada nacaybka iyo takoorka, oo ay ku jiraan taas oo ururada si ay u soo xiriir si noocyada kala duwan ee takoorka (tus guryaha, dugsiyada, shaqada, iwm).
- [The Southern Poverty Law Center](#), waxeey ogolyihiin in aad soo sheegto dhacdooyinka nacaybka websitokooda oga bandgig si ay u la socdaan dhacdooyinka ku xeeran dalka. Waxay kaa codsanayaan inaadse ubandhigto dhacdooyinkaas dambiyada nacaybka booliska maxalligaa marka hore.

Turjubaan: Talooyin iyo Fursado Tabaruceed

Hadii aad waqtigaaga ku caawini kartid ama hadii aad qareen oo raadinaysid turjubaan, buuxi [arjigaan](#).

FALAL DHEERI AH, MACLUUMAAD IYO LA XIRIIRID

Aniga asalkayga waxaan ka imaday Iiraan, Ciraaq, Liibiya, Suuriya, Soomaaliya, Suudaan ama Yaman

Aniga Waxaan Haystaa...	Waxaan Joogaa U.S.	Waa ka maqanahay U.S.
<p>Fiisada U.S (tusaale ahaan B-1 fiisada ganacsiga, B-2 fiisada dalxiiska, K-1 fiisada guurka, E-1 fiisada shaqaalo)</p>	<p>Ha ka bixin wadanka hadii aysan fiisadada kaa dhacaynin.</p> <p>Hadii ay fiisadada kaa dhici rabto ama aadan keeni karin sharuudaha lagaa rabo la xiriir qareenka socdaalka</p>	<p>Wareegto kasoo baxaday madaxweynaha ma soo gali kartid wadanka mudo dhan sagaashan (90) maalmood ama ka badan.</p> <p>Xaduuda U.S waxaa lagu soo waydiinayaa su'aalo baxad leh</p>
<p>Aqoonsiga deganaanshaha U.S. (greencardka U.S.)</p>	<p>Ha ka bixin wadanka.</p> <p>Hadii aad dhoofaysid waa lagu diidi karaa in aad ku soo noqotid wadanka, iyada oo aan la tixgalinayn inta sano aad haysatay aqoonsiga daganaanshaha (green card)</p>	<p>Wareegto kasoo baxaday madaxweynaha ma soo gali kartid wadanka mudo dhan sagaashan (90) maalmood ama ka badan.</p> <p>Xaduuda U.S waxaa lagu soo waydiinayaa su'aalo baxad leh</p> <p>La xiriir qareenka socdaalka <u>si deg deg ah</u></p> <p>Iyo xadka ha saxiixin warqada aad kaga tanasulaysid aqoonsiga daganaanshaha (Form I-407)</p>
<p>Waxaan haystaa basaboorka wadamada la mamnuucay laakin waxaan isticmalaa wadan kale basaboorkiisa (oo aan ahayn U.S.)</p>	<p>Ha ka bixin wadanka mudada lagu qabtay hadii aad donaysid in aad ku soo noqotid. La xiriir qareenka socdaalka in taadan dhoofin</p>	<p>Wareegto kasoo baxaday madaxweynaha ma soo gali kartid wadanka mudo dhan sagaashan (90) maalmood ama ka badan.</p>

Dooditaanka maxalliga ah

- **Madaarada turjubaanka:** luuqado Faaris iyo Carabi gaar ahaan aad baa loogu baahanyahay. Gaar ahaan sida qareenka. Hoos saxiix, si aad u caawiso qareenka dhulka ku madaarada hareeraha laga xoreeyo dalka ka Mareykanka.;
 - <https://docs.google.com/forms/d/e/1FAIpQLSecouJBDUSvoNbXDbWowSA74xuGdVE0uVIuFmEeIMe0v0TmVw/viewform?c=0&w=1>
 - **Tacliinta Against Executive Order Immigrationka:** Haddii aad ka shaqayso jaamacadaha, magacaaga si aad u ah codsi / warqad of dibad ku dari kartaa at link soo socda: <https://notoimmigrationban.com/>
- **Wac senatoryaashaada** iyagaa ku boorinayaa inay la diriraan mamnuucidda. Aqoonsanoow senatoryaashaada sideey ka dareensanyihiin ganaaxa iyo mamnuuca oo [halkan](#) kala xiriir iyaga.
 - 1-866-940-2439 - Wakiilka - [inta](#) ka raadi kuwa wakiilka
 - 1-866-961-4293 - Senators - [inta](#) ka raadi Senatoryaasha!
 - Dhakhso iyo huffanaan! Misaal waxaad odhan lahayd: “Madaxweeyne Trump iyo Kongreska waxaan ka codsanaaya inay amar siiyaan waaxda canshuuraha iyo laamaha ilaalinta xuduudaha (CBP) si aan loo xirin loona celinin qaxootiga, iyo in la tixgelinin qofka diintiisa, iyo asalkiisa, iyo in la nasakho Amarkan loo yaqaano (Executive Order). America waxay weligeed aheeyd meel ay u soo qaxaan qooyasaka tabaaleeysan dunida oo dhan. Qoysasku waa in aan la kala takoorin isla weynayaasha sababtood!”
 - Xittaa haddi wakiilladiin ay diidanyihiin amarkan mamnuucidda, waxaa muhim ah in aad wacdid una sheegtid in la nasakho amarkan. Wakiillada wax weyn bay tarta markey soo cabadaan dadka ay wakiilka ka yihiin; xoog bayna saarayaan haddi cabashadu ay badato.
- **U yabooh [ACLU](#)**, iyo hay’adda [National Immigration Project of the National Lawyer’s Guild](#), iyo hay’adda [CAIR](#).
- **Haashiyo ama Waraaqo qor!** Waxaad ka heli karta misaal ama nuqul warqadeed ku hagaagsan Kongreeska, iyo Aqalka Cad meesha ugu dambeeyso [dokumentigaan](#).
- **Tweetgaree Madaxweyne Trump!**
 - Hayadda Arab American Institute (AAI) oo masisha Carabta Mareeykanka, iyo Guddiga Caraba oo la Dagaallama Takoorta, (American Arab Anti-Discrimination Committee) waxay Tweetgareeyan Madaxweeyne Trump si uu nasakho Amarkan.
 - **Hashtagyada caanka ah waa:** #NoBanNoWall, #NoMuslimBan, #MuslimBan, #RefugeesWelcome.
 - **U yabooh [ACLU](#)**, iyo hay’adda [National Immigration Project of the National Lawyer’s Guild](#), iyo hay’adda [CAIR](#).
 - **Haashiyo ama Waraaqo qor!** Waxaad ka heli karta misaal ama nuqul warqadeed ku hagaagsan Kongreeska, iyo Aqalka Cad meesha ugu dambeeyso [dokumentigaan](#).
 - **Tweetgaree Madaxweyne Trump!**
 - Hayadda Arab American Institute (AAI) oo masisha Carabta Mareeykanka, iyo Guddiga Caraba oo la Dagaallama Takoorta, (American Arab Anti-Discrimination Committee) waxay Tweetgareeyan Madaxweeyne Trump si uu nasakho Amarkan.
 - **Hashtagyada caanka ah waa:** #NoBanNoWall, #NoMuslimBan, #MuslimBan, #RefugeesWelcome.

Caafimaadka Maskaxda (Qaranka iyo Maxalliga):

- [Ururka Islaamka ee Caafimaadka Maskaxda](#)
 - Daaweeyn dabiici ah ka hel: <http://www.muslimmentalhealth.com/mmh/directory>
- Caafimaadka Maskaxda ee Muslimiinta “[Mental Health4Muslims](#)”
 - Halkaan taabo si aad u heshid qof kaa caawiya arrimaha la xiriira niyadda iyo maskaxda “therapist”: <http://mentalhealth4muslims.com/mental-health-directory/#&panel1-1>
- [Stones to Bridges](#) - Talosiin gaar oo uusan qof kale ogeyn oo loogu talagalay dhalinyarada. “Anonymous Counseling for Muslim Youth”
- [NASEESHA](#) - Talosiin Dhalinyarada Muslinka ah “Muslim Youth Helpline”
- [National Alliance of Mental Illness](#) - U gudbin Meelaha Caafimaadka “Provides Referrals”
- [Therapists of Color Referrall Share](#)
- [Muslim Alliance for Sexual and Gender Identity](#) - Macluumaad loogu talagay Muslimiinta oo la xiriirta xaga jinsiga “Referral Source for LGBTQ Muslims”
- [Project Sakinah](#) - Liiska Muslimiinta Dhakhtarka Niyadda “Directory for Muslim Therapists
- California:
 - [RAHAA](#), Hay’adda Iiraaniyiinta Mareeykana ee Waqooyiga Kalifoornia oo qaabilsan caafimaadka maskaxda.
 - [Khalil Center](#), Adeeg Talo-siin ee Waqooyiga Gobolka Kalifoorniya “Counseling and Therapy Services”
 - [UCSF Trauma Recovery Center](#), Adeeg Talo-siin ee Waqooyiga Gobolka Kalifoorniya “Counseling and Therapy Services”
 - Hay’adda Adeegga Muslimiinta “[Muslim American Society- Social Services Foundation \(MAS-SSF\)](#),” Sacramento, CA
 - Ururka Bulshada Muslimiinta “[the Muslim Community Association of Santa Clara, CA](#)”
 - Ururka Caafimaadka Haweenka “[El Camino Women's Medical Group](#),” Mountain View, CA
- - [Machadka Omid](#) (Omid Institute), Irvine, CA
- Minnesota:
 - [Diiwaanka Minnesota oo caawiya dadka qaxootiga maskaxda ka jirran](#)
- Oregon:
 - [Diiwaanka Oregon oo caawiya dadka qaxootiga maskaxda laga haayo](#)
- Pennsylvania:
 - [Iskaashiga Caafimaadka Qaxootiga ee Philadelphia](#)
 - Mashruuca iskaashiga Caafimaadka Qaxootiga ee Philadelphia (PRMHC). www.culturalcommunities.org
- Washington DC:
 - [Potomac Muslim Counseling Link](#)

Caawimaadka Qaxootiga Dalka Gudahiisa:

- Xarunta qaxootiga waxay haaysa macluumaad wax tar u leh qaxootiga: <https://therefugeecenter.org/how-will-president-trumps-executive-order-affect-refugees/>
- **Philadelphia, PA:**

- Xarunta Qaranka ee Kaalmada: <https://nscphila.org/>
- **Dallas, TX:**
 - Xarunta Qaxootiga ee Texas: <http://www.rstx.org/dallas.html>

Ka Qaybqaado kuna xiriirsanow:

Akoontiyada Social Media-ha ee Kala Soconi Karto

Urur	TWITTER	FACEBOOK
CUNY CLEAR	@CUNY_CLEAR	CUNYClear
CAIR (National)	@CAIRNational	CAIRNational
Muslim Advocates	@MuslimAdvocates	MuslimAdvocates
American-Arab Anti-Discrimination Committee (ADC)	@aayoub	ADCNational
Arab American Institute	@AAIUSA	ArabAmerican Institute
ACLU National	@ACLU	ACLU.Nationwide
JFK Attorneys	@NoBanJFK	
Muslim Anti-Racism Collaborative (Muslim ARC)	@MuslimARC	MuslimARC
OneJustice	@OneJusticeOrg	OneJustice

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan socdaal (Xisaabaad iyo Xeerar)

- Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeri ah oo muhiim u ah inaad iskaga difaacdid dadka aaminsan mamnuuca [halkan](#).
- Hal bog oo kale oo dheeri ah oo sharxayo mamnuucan waxaad ka heli kartaa [halkan](#).